



Tilmaanta/Amarka 8aad ee Dakhliga. Jadwalka Taariikhda kama dambaysta ah ee in La Bixiyo Cashuuraha

1. Tilmaantan/Amarkan waxaa soo saarey Wasiirka Maaliyadda si waafaqsan qaybta 20aad ee Xeerka Dakhliga Dowlad-goboleedka Galmudug State of Somalia ee 2017.
2. Tilmaanta/Amarka waxaa uu dhaqangelayaa 1^{da} Jannaayo 2019.
3. **Hadafka:** In la cayimo taariikhda ay tahay in la bixiyo cashuuraha.
4. **Jadwalka:**

Tiro Taxan	Nooca Cashuurta	Taariikhaha ay tahay in la bixiyo
1.	Cashuurta Mushaaraadka (Payroll Tax)	20 ^{ka} Abriil ama ka hor in la bixiyo cashuurta rubaca koowaad ee sanadka, 20 ^{ka} Luuliyo tan Rubuca 2aad, 30 ^{ka} Sebtembar tan rubuca 3aad iyo 31 ^{ka} Disembar tan rubuca 4aad Diiwaannada mushaaraadka oo hantidhowr lagu sameeyey waa in la soo bandhigaa ka-hor bilaabashada sanad-maaliyadeedka xiga
2.	Cashuurta Dakhliga Shakhsiga/Personal Income tax (PIT)	PIT waa in la soo gudbiyaa ka hor maalinta 5aad ee la shaqeeyo Bisha Xigta
3.	Cashuurta iibka/dakhliga (Turnover tax)	20 ^{ka} Abriil ama ka hor in la bixiyo cashuurta rubaca koowaad ee sanadka, 20 ^{ka} Luuliyo tan Rubuca 2aad, 30 ^{ka} Sebtembar tan rubuca 3aad iyo 31 ^{ka} Disembar tan rubuca 4aad
4.	Shati Ganacsi	Lacagta waa in la bixiyaa ka hor 1 ^{da} Maarso sanad walba
5.	Cashuurta hantida magaalooyinka	Lacagta waa in la bixiyaa ka hor 31 ^{ka} Maarso sanad walba
6.	Cashuurta shidaalka	20 ^{ka} Abriil ama ka hor waa in la bixiyaa cashuurta rubaca koowaad ee sanadka, 20 ^{ka} Luuliyo tan Rubuca 2aad, 20 ^{ka} Oktoobar tan rubuca 3aad iyo 20 ^{ka} Disembar tan rubuca 4aad
7.	Cashuurta dhalinta korontada	20 ^{ka} Abriil ama ka hor cashuurta rubaca koowaad ee sanadka, 20 ^{ka} Luuliyo tan Rubuca 2aad, 20 ^{ka} Oktoobar tan rubuca 3aad iyo 20 ^{ka} Disembar tan rubuca 4aad
8.	Ujuurada suuqa	Lacagta waa in la bixiyaa ka hor 5 ^{ta} Bisha ku xigta
9.	Rukh-sadda iyo diiwaangelinta baabuurta	Ujuurada rukh-sadda iyo diiwaangelinta baabuurka waa in la bixiyaa marka baabuurka la soo iibsado, iyo ka hor 31 ^{ka} Maarso ee sanad kasta oo ku xiga



Galmudug State
Ministry of Finance & Economic Development

10.	Shatiga soo-saaridda iyo gurashada kheyraadka	Qof kasta oo ka shaqeysta ganacsi kheyraadka lagu taxay Jadwalka 3aad ka soo saara ama ka gurta dhulka dadweynaha ee Dowlad-goboleedka, ama dhul dowladaha hoose, waa in uu shati uga qaataa Dowlad-goboleedka Galmudug oo loogu oggolaanayo in uu la soo baxo ama gurto kheyraadka noocaas ah. Ujuurada shatiga waa in la bixiyaa marka la qaadanayo shatiga.
11.	Diiwaangelinta NGO-yada, Sharikadaha Gaarka ah iyo Hay'adaha Maareeya Maaliyado.	Cid kasta oo maamusha ama dooneysa in ay maamusho Urur Aan Dowli Ahayn (NGO), sharikad gaar loo leeyahay, ama maareeyso maaliyado ka dhex shaqeeya dhulka Dowlad-goboleedka Galmudug waa in ay ugu dambeyn 31 ^{ka} Maarso, ka hor inta aaney hawl bilaabin ay diiwaangeliso ayna hesho shahaaddo diiwaangelin oo ay bixiso Wasaaradda Dowlad-goboleedka Galmudug State ee ka mas'uulka ah Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah.
12.	Cashuurta mashaariicda	Qiimaha cashuurta mashaariicda. NGO-yada, maareyeyaasha maaliyadaha deeqda ah, iyo sharikadaha mashaariic gaar ah ka fulinaya degaanka Dowlad-goboleedka waa in ay bixiyaan cashuurta iibka/dakhlaga ka hor inta aaney hirgelin mashruuc
13.	Cashuurta Waddo-marista	Dhammaan baabuurta ganacsiga iyo kuwa xamuulka ee soo gelaya ama ka baxaya dhulka Dowlad-goboleedka Galmudug waa in ay bixiyaan cashuurta waddo-marista ka hor inta aaney ka biixn/soo gelin dowlad-goboleedka
14.	Lacagta fiisaha	Ujuurooyinka fiisaha waxaa lagu bixinayaa meelaha laga soo galo ka hor inta aan la soo gelin dhulka dowlad-goboleedka Galmudug

Wasiirka Maaliyadda & Hor. Dhaqaalaha

Saciid Siyaad Shirwac

